Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Hadal-qoraaalka kalfadhiga 4aad
Documentiga Kulankii 21aad **Taariikhda: 04/05/2014**

Kalfadhiga 4aad
Kulankiisii 21aad
Saacada la furay: 11:30 am
Saacada la xiray: 1:00 pm
Guntanka: 143 xildhibaan

Ajandaha

1. **Furitaanka aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Su'aalo wadareedka Wasiirka Dekedaha**
4. **Iyo wixii kaloo howl ah.**

Shir-guddoomiyaha Guddoomiye K/xigeenka 1-aad ee Golaha Mudane Jeylani Nuur Iikar,

Maanta shirka waxaa furay Guddoomiye K/xigeenka 1-aad **Mudane Jeylaani Nuur Iikar** waxaana lagu furay Aayadaha Qur'aanka Kariimka uuna akhriyay xil. Sheekh Shaacir. Guddoomiyaha wuxuu sheegay in Xeer-hoosaadka laysxasuusiyo oona lagu algu dhaqmo, mas'uuliyadda nasaarana aan dhoorno waqtigana aan ilaalino. In manta aan la leenahay Su'aalo wadareed Wasiirka Dekedaha. Waxaa isqoray 13xildhibaan oo doonayo iney su'aalo weydiiyaan Wasiirka Dekedaha.

Su’aal

Xildhibaan Xaafe

Anigoo xog ogaal u ah Degeda ayaa Gaadiidka ka shaqeeya iyo Doonyaha waxaa laga qaadaa lacag xad dhaaf ah, mudne maxaad ka ogtahay

1Dekadda waxaa ka jira dulmi aad u farabadan oo ah in laga qaado 50% ilaa %80

2. Maraakiibta markey soo xirato waxaa bilaabato wax layiraahdo Jaajar oo markey konteenarka la dhigo dhulka waxaa laga qaadaa lacag fara badan lacagahaasi waa labo ma waxaa iska leh Wasaaradda Maaliyadda mise Wasaaradda Gaadiidka warbixin kooban naga sii. Mudane wasiir

Xil. C/laahi Ciise

1. Dalka wuxuu leeyayhay sharci maalin walbo meel ayaa la qabsadaa maxaa idinkaga qorsheysan ood ka qabaneysaan.

Xil. C/llaahi Jaamac

1. Burburkii dagaalada ka dhashay ayay leedahay oo uma eka Dekada meel ay dowladi leedahay
2. Yaa gacanta ku haayo Dekedda daqliga kasoo galana meeqa ayay la ektahay yaase badan tii hore iyo tan hada

Xil. Saynab Caamir

1. Agaasimaha ama maareeyaha Degada iyo adiga waxa aad ka qabataan inoo sheeg.
2. Shaqaalaha Dekeda waxaa heysata dhibaato farabdan, ma waxaa u sabab ah adiga mise Maareeyaha.
3. Iyo in lasoo caliyo maraakiibtii ay wadanka laheyd.

Jawaabta:

Wasiirka

- Intaan xilka hayo waxaan isku dayay inaan ogaado xogta rasmiga ah xitaa waxaan u tagay Ra'iisul wasaaraha waana run in laga qaado lacag badan waxaan jeclahay wixii ka qabsoomaaya in aan wax ka qabano.
- Waxaan ku tala jirnaa anaga iyo wasaaradda gaaashaandhiga in aan ilaalino xeebaha.
- Dekadda waxaa maamula maareeyaha
- Farqiga u dhaxeeya waa markii hore waxay ahayd 1miltion haddana waxaa laga helaa 2ilaa 3 miltion.
- Waxaan ku leenahay in aan dabagal ku sameyno.
- Dekadda waxaa mushaar ka qaato 600 oo Shaqaalae dowladeed ah.
- Waxaa muruq maalka ka shaqeeyo gaarayaa 6600 oo qofood.
- Hal markab bunitland 2 na waxay yaalaan dalka Yaman,waxayna sheegeen in ay ku leeyihiin deyn

Suaal:

Xildhibaan Cismaan Muqataar:

1. Xiriir mala leedihiin Dekadaha kale sida Kismaayo, Buntiland?
2. Lacagta Muruqmaalka ay qaataan in laga qaato kala bar maxay ku dhacday?
3. Waxaa la sheegay inaadan umadax banaaneen maamulka dekadda?

Xil.Xeyd:

1. Xilka wasiirka Dekadda adiga miyaa doortay mase waa laguu magacabay?
2. Masuu roobi kartaa in xeebaha aanan la dhisan Karin aanan lasiin Karin dad shisheeye?

Xildhibaan Cismaan Aadan Dhuubow:

1. 26 /marso/2014 waxaad kulan la qaadatay Guddiga gaadiidka ah si offishaal ah waxaana ku weydiinay Docomintiga Heshiiska, waxaana ku jawaabtay inaadan heynin documentiga Maxay ku dhacday?
2. Maxaa keenay in shirkad aan sharci ahayn loogu wareejiyo Degedda, maxeyse Wasaaradda ka qabtaa?
3. Maxaa keenay in jay laga keeno Dalka Dibadiisa?

4. Maxaa loo howlgalin waayay wakaaladaha Xamar?

Xildhibaan Shuuriye

1. Hishiiska aad la gashay Al-feyr waa inaad noo bayaanisaa?
2. Inta aanan lagalin hishiiska ma jiraan wax naqshad ah oo lagu dhisaayo Degedda. Hadii la sameeyay waa noocee?

Jawaabta:
Wasiirka:

- Xiriir lacageed iyo xiriir maamulba nagama dhaxeeya ee waxaa naga dhaxeeya xiriir isgaarsiineyd. Iyo tababaro
- Xoogsatada waxay leeyihiin maamul ayaga ugaar ah oo anga na hoos yimaado.
- Booskaan waa la ii doortay. Shaqaalahana in ladaryeelo oo la hagaajiro waan ka simanahay. Midda doonyahana waxaa ina siiyay ciidanka
- Waa in qadaraas lagu bixiyaa wax kastoo oo tartan lagalinaayo.
- Maadaama uu aniga hishiiskaas iga horeeyay, Naqshadda wey ku taalaa In labalaariyo maraakiibta, balse mar haddii hishiis lagalaayo waa in Baarlamaanka nala ogaadaa.
- Markabka jaayga ah anigaba waa la ii sababeeyay, waxaa la ii sheegay in laga helo Beydhabo iyo meelo kale ee jidka ayaan lasoo marsiin Karin.

Su'aal:
Xildhibaan Max'ed Cumar Dhalxa

1. Waxaan kaa codsaneynaa inaad noo faah faahisid arimaha Degadda?
2. Soomaali furut waxaa lagu wareejiyay Dowladda Turkiga maxaa ka jira?
3. Majirtaa in shaqaalaha Degedda ay isku dulnool yihiin,shaqaalaha 600 lixda boqol iney qaataan mushaarkooda ma kormeetaa?
4. Qadaraasyada iyo gaadiidka ka shaqeeya Degedda dhexdeeda maxaa daqli ah ood ku leedihiin, baabuurta qaarbaa lix bari iska fadhiya qaana garabeeshin ayaa ku galaan maxaad ka ogtihiin? Mida jaayga ah hadduu lacag la'aan yahy waan soo dhaweyneynaa laakiin lacag ma yeeleyno?

Xildhibaan C/raxmaan Suge

1. Degadda ma waxa maamulo Maareeyaha mise Wasiirka ?

Xildhibaan Maxamed Amiin

1. Ma jirtaa inaadan gacanta ku heynin markii laga reebo Degadda Muqdisho?
2. Ma isku dayday inaad xirii lasameyso Degadda Jubaland?
3. Maxaad ka ogtahay inuu jiro markab kale oo layiraahdo Cusmaan Geedi raage?

Xildhibaan Cabdalla Boos

1. Hanti qaran markii lawareejinayo oo lagu wareejinayo ajanabi waa in uu Baarlamaanka ansixiyo, haddana waxaad ku shaqeyneysaan mugdi?
2. Dhulka aad ka u balaaran ee soomaali furut waa inaad u sharaxdaa Baarlamaanka?
3. Doonyaha laidiin keenay waa noocee? Haddii ay yihiin kuwii laysku ilaalinayay waa qaldan tihiin ee waxaa iskaleh W/Gaashaandhiga?
4. Dhulka hadda la dhisanaayo ma idinkaa fasaxay mise Xukuumaddii hore?
5. Markabka Butland 2- wuu shaqeeyaa waana maraakiibta qaado konteenarada

   Yurub ayuuna ka shaqeeyaa, ee Yeman waxaa yaala dooman yay yar aan anaga leenahay, markabka kale ee Cusmaan Geedi raage asna wuxuu yaalaa Talyaaniga oo wuu shaqeeyaa wuxuuna ka shaqeeyaa dalal badan oo Yurubta ka mid ah

Xildhibaan Muuse Sheekh Cumar

1. Ma inoo sheegi kartaa shaqaalaha Degedda rag iyo dumar sidee kala yihiin?
2. Imisaa wax kasoo gaartay intii laga shaqeeynaayay?
3. Inta cuuryaantay bedel ma helaan ama inshuurance?
4. Imisaa loo ogolyahay gaari walbo oo loo qorsheeyay?
5. Maxay ku dhacday iney Dowladda hanaweyso Degedaha kale ee wadanka?

Jawaab
Wasiirka

- Majiraan in Soomaali furut lagu wareejiyay Dowladda Turkiga.
- Gaadiidka iyo Wide House ka waxaa ka jira wali bur burkii wadanka ee baqaarada waa weyn waxaa kireysta dad shacab ah.
- Wasaaradda wax daqli ah oo Degedda kasoo gala ma jiraan, anaga miisaaniyad aan sameysanay ayaan isticmaalnaa, haa waxaa ka qeybqaato Afar gaadiid kuwa wiishash ka ah.
- Maamulka Dekedda waxaa mas'uul ka ah Maareeyaha laakiin amarkeena ayaa ka socdo
- Kama quusanin inaan la galno hishiis Juba-land sababtoo ah hadda ayaan waxaan u raadineynaa wiishash iyo wax yaabo kale ay u bahan yihiin.
- Waxaan idiin cadeeynayaa ineysan Al-bayaan wax howl ah ka wadin Degedda.
- Sharci shaqaalo ayaa ka jira Dekedda isagaana la waafajinayaa
- Baabuurta qaar ayaa waxey qaadaan 5ilaa6 tan.

Shir-guddoonka Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Baarlamaanka, Mudane Jeylaani Nuur iikar ayaa sheegay in ay isu qoreen Su'aalo wadareedkii maanta lala yeeshay Wasiirka Dekedda 15 xildhibaan kuwaas oo 2 kamid ah wey maqneyd inta kalena wey su'aali doonaan. Gudoomiyuhu wuxuu sheegay in kalfadhigii 4aad kulankiisa 21aad uu xiran yahay saacadu markay ahayd 1:00 pm.